



Mataga Carruuta iyo Sabiyada

Talo ka socota Hay'adda Fulinta AdeegaCaafimaadka (HSE) oo loogu talagalay waalidiinta iyo dadka carruurta ka masuulka ah.

Isha:www2.hse.ie/conditions/vomiting-babies-children/

Markii u dambaysay ee dib loo eegay: 13 Abriil 2023

Mataga Carruuta iyo Sabiyada

Waa caadi in sebiyadu qaddar yar matagaan ka dib marka la quudiyo.

Islamarkiiba wac Dhakhtarkaaga Guud haddii ilmahaagu:

- matagay wax ka badan 3 jeer 24-kii saacadood ee la soo dhaafay
- uu matagayay wax ka badan 3 beri
- uu leeyahay astaamo fuuqbax
- dhowaan ka soo laabtay safar dalka dibadiisa ah oo uu leeyahay matag ka badan intii caadiga ahayd
- heerkulkiisu sarreeyo - 38°C sebiyada ka yar 3 bilood, ama 39°C sebiyada ka wayn 3 bilood
- leeyahay calool xanuun daran
- dhiig leh, cawlan, ama cagaaran

Islamarkiiba wac lambarka ambalaasta ee 999 haddii:

- ilmahaagu qoortu adkaatay, madaxu xanuunayo, finan leeyahay, oo matagayo.

Daryeelka ilmaha xanuunsanaya

Intabadan ilmahaaga guriga ayaad ku xanaanayn kartaa oo ku baxnaanin kartaa. Waxaad siin kartaa kaarjabin dareere ah haddii heerkulkoodu sarreeyo ama calooshu xanuunayso.

Ha warwarin haddii ilmahaagu cuntada cuni waayo. Waxa ka muhiimsan inay cabbaan cabitaan badan, sida biyo ama sharaab. Ha siin cabbitaanada miraha ama kuwa soodhaha leh intay ka fiicnaanayaan.

Aamin maaha in la barxo oo biyaha laga badiyo caanaha carruurta. Masaasada ilmaha ugu diyaari sidii caadiga ahayd adigoo ilmaha cabbitaano iyo biyo dheeraad ah caanaha u raacinaya.

Ilmaha naaska jaqa ama kuwa caanaha carruurta la siiyo

Haddii ilmahaagu weli naaska jaqayo ama caanaha carruurta la siiyo, sidii caadiga ahayd ugu sii wad. Haddii aad ilmaha naaska nuujiso, waxa laga yaabaa in ilmuhu marar badan naaska jaqo markuu xanuunsanayo. Looma baahna inaad ilmahaaga siiso cabbitaano dheeraad ah.

Hawluhu waa ku badan yihiin hooyo daryeelaysa ilmo xanuunsan, qaado nasashada ugu badan ee suurtoagal ah oo ilmahaagana soo dhawayso.

Fuuqbaxa

Matagu wuxu sababi karaa in ilmahaagu fuuqbaxo. Waa muhiim in ilmuhu cabbaan cabitaan badan.

Farmasiilahaaga ka dalbo inuu ku siiyo dareeraha fuuqcelinta afka laga qaato. Ilmahaaga u gee dhakhtarka haddii aad ka walwalsan tahay inay fuuqbaxeen.

Astaamaha fuuqbaxa daran ee sebiyada iyo carruurta yaryar lagu garto waxa ka mid ah:

- xafaayad qoyntooda oo intii hore ka yar (kaadidooda oo yar)
- lulo ama inay adkaato in hurdada laga kiciyo
- maqaarka oo midab dilma ama cawlanaada
- gacmaha iyo cagaha oo qaboobaada

Muhiim

Ilmahaaga islamarkiiba ula carar waaxda gurmada degdega ah ee isbitaalka kuugu dhow haddii aad ku aragto mid ka mid ah astaamaha fuuqbaxa daran.

Sababaha

Mataga waxa sababi kara caabuqyada caadiga ah sida caabuqa caloosha iyo xiidmaha (caabuqa shubanka).

Sababaha khatarta badan waxa ka mid ah:

- scaabuqyada sida qoorgooyaha, oofwareenka iyo caabuqyada ku dhaca kaadi mareenka
- cudurka gaastarida ama laab-dillaaca
- xasaasiyadda caanaha ama xasaasiyadaha cuntada
- cudurada saameeya xiidmaha, sida cudurka dhuunta isku xirta xiidmaha yar iyo calooshu ciriiriga noqoto (pyloric stenosis) ama qaybaha xiidmaha oo isdhexgala (intussusception)
- Xiidmo xiran (strangulated hernia)
- qabsin

Wac dhakhtarkaaga ama isbitaal degdeg u tag haddii:

- aad u malaynayso in mataga ilmahaagu uu ka dhashay wax khatar ah.

Ilmahaaga gee waaxda gurmada degdega ah ee kuugu dhow haddii uu hayo xanuun aad uga sii daray oo ku faafaya guud ahaan ubucdooda.

Sunta

Islamarkiiba wac Xarunta Macluumaadka Sunta ee Qaranka haddii aad u malaynayso in ilmahaagu liqay waxyaabo sun ah.

Xarunta Macluumaadka Sunta ee Heerqaran

(01) 809 2166

Saacada furitaanka: 8 subaxnimo illaa 10 habeenimo (7 beri ee todobaadkii)

Wixii ka baxsan saacadaha, kala xidhiidh isbitaalkaaga ama dhakhtarkaaga cudurada guud wixii adeegyo ah ee ka baxsan saacadaha la shaqeeyo. Xaaladaha degdega ah, soo wac 999.

Jooji faafitaanka caabuqyada mataga leh

Caabuqyada mataga leh aadbaa la isugu gudbiyaa.

Gacmahaaga iyo kuwa ilmahaaga ku dhaq saabuun iyo biyo diirran, oo si fiican u qallaji:

- ka hor iyo ka dib markaad daryeel siiso qof jirran
- ka dib markaad nadiifiso qof matagay ama shubmay
- ka dib markaad musqusha gasho ama ilmahaaga musqusha geysa
- ka dib markaad ilmahaaga ka beddesho xafaayadda
- ka dib markaad taabato hilib qeerin, qashin, xayawaan ama saxaro xayawaan
- ka hor cuntada
- markasta oo gacmahaagu wasakhoobaan

Sidoo kale waxaad:

- goobaha si fiican ugu nadiifin kartaa saabuun iyo biyo kulul
- dharka iyo gogosha waskhowday ku dhaqi kartaa biyo aad u kulul
- tuuri kartaa ama dhaqi kartaa qalabka nadaafadda ee la isticmaalay
- marnaba qof xanuunsanaya ha u ogolaan inuu cuntada diyaariyo
- hubi in ilmahaaga jirran aanu shukumaanada/tuwaalada la wadaagin dadka kale

Muhiim

Ilmahaaga guriga ku hay oo ha u dirin rowdada, xannaanada ama dugsiga illaa intay ugu yaraan ka soo wareegayso 48 saacadood ka dib markii u dambeysay ee ay shubmeen ama matageen.